

Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda Macmiil iyo Qareen

1. La kulan qareenkaaga marka ugu dhaqsida badan kaddib markii aad Foomka Macluumaadka Shakhsiga-FMS (Personal Information Form-PIF) ka hesho Guddiga Socdaalka iyo Qaxootiga – GSQ (Immigration and Refugee Board-IRB). *Adiga iyo Qareenkaaga* waxaad leedihiin 28 maalmood oo keliya in aad ku buuxisaan FMS (PIF)uguna dirtaan GSQ (IRB).
2. Haddii aad guddoonto warqad ku saabsan qoraal fikrad qareen oo keliya hay'adda Kaalmada Sharciga (Legal Aid) waxay lacag ku siin doontaa qareenkaaga in uu dib u eego codsigaaga fikradna ka bixiyo. Markaa ayay hay'adda Kaalmada Sharciga go'aammin doontaa haddii ay qareenkaaga lacag ku siin doonto in uu kuu diyaariyo FMS dacwaddana kugu matalo. GSQ wuxuu xoojinayaa muddada soo gudbinta u xaddadan ee 28 maalmood ah, xataa haddii hay'adda Kaalmada Sharciga waydiinayso qareenkaaga qoraal fikrad.
3. Haddii aad guddoonto warqad ku saabsan diyaarinta FMS iyo matalid GSQ hortiisa, hay'adda Kaalmada Sharciga ayaa qareenkaaga lacag ku siin doontaa adeegyadan. Adiga qareenka lacag ha ku siin adeegyadan.
 - Waa in uu qareenkaaga shakhsi ahaan kulan waraysi kaala yeeshaa FMS inta aadan saxiixin.
 - Kulannada oo dhan qareenkaaga waa inuu kuu keenaa turjubaan haddii aad u baahan tahay. Hay'adda kaalmada sharciga lacag ayay siin doontaa turjubaanka (ila iyo 10 saacadood, ama ka badan haddii qareenkaaga uu helo oggolaansho). Adiga turjubaanka ha siin lacag.
 - Hubso in uu FMSgaaga dhan yahay, meel kastaba sax ka yahay, si fiican aad u fahansan tahay inta aadan saxiixin. FMS waa bayaankaagii, marka waxaa lagaa filayaa in aad fahansan tahay. Haddii loo baahdo, xaq ayaad u leedahay in aad saxdo FMS inta aadan saxiixin.
 - Qareenkaaga waa in uu FMS oo saxiixan ee loo diray GSQ kaa siiyaa koobi dhan.
 - Haddii ay qareenkaaga la tahay in dacwaddaada looga baahan yahay rabboor dhakhtareed ama dhakhtar maskaxeed, qareenkaaga wuxuu kuu diri doonaa dhakhtar ama dhakhtar maskaxeed si aad uga soo hesho mid. Hay'adda Kaalmada Sharciga ayaa qareenkaaga ka siin doonta rabboorkan caddad lacageed ee loogu talagalay. Adiga rabboorkan lacag ha ku bixin.
 - Haddii ay jiraan waraaqo ku qoran Ingiriisi ama Faransiis, waa in la tarjumaa inta aan loo gudbin GSQ. Haddii aqoonsigaaga ama waraaqahaaga shakhsiga ah tarjumid u baahan yihiin, kala hadal qareenkaaga. Hay'adda Kaalmada Sharciga ayaa tarjumidda ku bixin doonta lacag xaddadan. Haddii aad haysato waraaqo dheeraad ah ee tarjumid u baahan, qareenkaaga ayaa waydiin doona hay'adda Kaalmada Sharciga inta dheeraadka ah in ay bixiso lacagtooda haddii loo baahan yahay.
 - Qareenkaaga waa in uu kula kulmaa si uu kuugu diyaariyo dacwaddaada waana in uu kuu raaca dacwadda haddii aydan ku wada heshiin in qareen kale uu ku matalo ama arday qodob qoraa ah ee si toosan uu u kormeerayo qareenkaaga.
 - Qareenkaaga waa in uu kuu sheega inta hoos joogta warqadda kaalmada sharciga ee kula shaqayn doonta, kula diyaarin doonta FMS kuuna raaci doonta dacwaddaada, iyo haddii uu ruuxaasi yahay ama uusan ahayn qareen.
- IV. U sheeg hay'adda Kaalmada Sharciga, qareenkaaga, GSQ, iyo Waaxda Socdaalka haddii aadbeddeshid cinwaankaaga ama lambarka telefoonkaaga.

Fadlan waydi qareenkaaga haddii uu/ay ku jiro ama ku jirto Guddiga Qaxootiga ee Kaalmada Sharciga Ontario uuna oggol yahay in uu guddoomo warqaddooda haddii lagu siiyo. Haddii aadd qabto wax su'aala ah ama hubsiino ah, dib ugu laabo xafiiskii aad ka codsatay kaalmo sharci.